

Daryeelka Maqaarka-isku-dhafka ah ee Ilmahaaga

Skin-to-Skin Care for Your Baby (Somali)

Daryeelka Maqaarka-isku-dhafka ah (STS), ama daryeelka kangaroo-ga, waa hab gaar ah oo ilmahaaga lagu hayo. Waxay xiran yihiin oo keliya xafaayad marka ay saaran yihiin laabtaada qaawan (Sawirka 1). Ilmahaaga wuxuu dareemaa raaxo badan marka uu kuu dhowyahay, maadaama uu horey u yaqaan urkaaga, taabashadaada, codkaaga, iyo garaaca wadnahaaga. Daryeelka naas-nuujinta maqaarka-isku-dhafka ah wuxuu faa'iidooyin badan u leeyahay dhallaanka, gaar ahaan haddii ay ku dhasheen waqtii hore ama miisaan hoose.

Faa'iidooyinka ilmahaaga:

- Way sii diirran yihiin, taasoo u fiican heerkulka jirkooda.
- Waxay hagaajisaa garaaca wadnaha iyo neefsashada.
- Waxay miisaankooda wuu kordhaa, sidoo kalena si wanaagsan bay u seexdaan.
- Wax yar ayay ooyaan oo walbahaarkooduna wuu yaraadaa.
- Waxay dareeman xanuun yar waxayna khatar yar u leeyihiin infekshanno.
- Waxay yeeshaan korriin iyo horumar maskaxeed oo wanaagsan.
- Waxay si wanaagsan u xoojiyaan xiriirkha ay la leeyihiin waalidka.



Sawirka 1 Daryeelka
maqaarka-isku-dhafka ah

Faa'iidooyinka waalidiinta:

- Xiriirkooda ay la leeyihii ilmahaha wuu sii xoogeystaa.
- Walbahaarkoodu wuu yaraadaa.
- Caanaha bay ku kordhiyaan waxayna si fiican u awoodayaan inay ilmaha naas nuujiyaan.
- Kalsoonidooda daryeelka ilmaha way sii korortaa.

Kahor Intaadan Qabanin

Waxaad bilaabi kartaa qabashada daryeelka naas-nuujiinta maqaarka-isku-dhafka ah marka aad awoodo inaad ag fariisato sariirta ilmahaagaaga. U sheeg kalkaalisaada marka aad diyaar u tahay inaad qabato ilmahaaga. Waxay kuu sharxi karaan habraaca waxayna ka jawaabi karaan su'aal kasta oo aad qabto. Kahor intaadan samaynin daryeelka naas-nuujiinta maqaarka-isku-dhafka ah markii ugu horreysay, waxaa laga yaabaa inay kaa caawiso inaad sameyso fadhi tijaabo ah.

Waxyabaha la qabanayo kahor qabashada daryeelka naas nuujiinta maqaarka-isku-dhafka ah:

- Soo qubayso kahor intaadan imaan isbitaalka. Kafiiri xabadkaaga finan ama dhaawac furan. Haddii aad qabto waxyaabahan, ha samayn daryeelka naas-nuujiinta maqaarka-isku-dhafka ah ilaa maqaarkaagu ka bogsado.
- **Ha cabin sigaarka**, hana isticmaalin uunsi, cedar, ama kareemo udgoon kahor intaadan samaynin daryeelka naas-nuujiinta ee maqaarka-isku-dhafka ah.
- **Ku shub caanaha oo musquasha tag ka hor intaadan bilaabin qabashada daryeelka naas-nuujiinta ee maqaarka-isku-dhafka ah.** Waad ku shubi kartaa caanaha adigoo samaynaya daryeelka naas-nuujiinta maqaarka-isku-dhafka ah haddii aad ilmahaaga haynayso waqtii dheer. Waydiiso kalkaalisaada ilmahaaga inay ku caawiso.
- U sheeg kalkaalisaada marka aad imaanayso si aad u qabato ilmahaaga, si ay isugu diyaariso. Qorshee inaad **ugu yaraan 1 saac** ku qaadato daryeelka naas-nuujiinta maqaarka-isku-dhafka ah.
- Weydii kalkaalisaada maro loogu talagalay daryeelka naas-nuujiinta maqaarka-isku-dhafka ah. Waxa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad xirato ama keento shaati ballaadhan ama jaakad hore ka furmaysa.

* **Haddii ilmahaaga uu wato tuubada neefsashada, akhri oo raac tilmaamaha ku qoran bogga 3.**

Qabashada Daryeelka Naas-nuujinta Maqaarka-Isku-dhafka ah

- Wuxaad ilmahaaga ku qaban doontaa sariirtiisa agteeda adigoo ku fadhiya kursi jiifa. Sariirta qof wayn ayaa laguu keeni karaa hadaad ubaahato. Wuxaan bixinaaya go'yal ama daahyo aad arimahaaga gaarka ah ugu isticmaasho.
- Wuxaan kugula talineynaa inaad sameyso daryeelka naas-nuujinta maqaarka-Isku-dhafka ah ugu yaraan **1 saac maalintii**, ama muddada uu ilmahaagu ku jiro si raaxo leh. Inaad hayso waqtii dheer waa ka wanaagsan, laakiin xitaa waqtii yar wuu faa'iido leeyahay. Isku day inaad sida ugu badan u samayso daryeelka naas-nuujinta maqaarka-Isku-dhafka ah inta uu ilmahaagu isbitaalka joogo.
- Ka bix shaadhkaaga iyo/ama bra-ga, ka dibna xiro marooyinka daryeelka naas-nuujinta maqaarka-Isku-dhafka ah. Waad xidhan kartaa shaati hore ka furan oo aad ka kor xiratid marada si aad raaxo dheeraad ah u dareento. Ilmahaaga waa in uu xirnaado oo keliya xafaayad, waxaana laga yaabaa in loo geliyo koofiyad si uu u diirnaado.
- Kalkaalisdhu way kaa caawin kartaa dejinta ilmahaaga. Marka uu ilmahaagu saaran yahay laabtaada qaawan, kalkaalisdhu waxay kaa caawin kartaa inaad si wanaagsan ugu xajiso marada daryeelka naas-nuujinta maqaarka-Isku-dhafka ah, kadibna waxaad ku dabooshaa buste. Tani waxay ka caawin doontaa ilmahaaga inuu diirnaado oo si ammaan ah u sii joogo meeshiisa.
- Iska dhig mid ku raaxayso kursiga jiifa. Kuraaxayso xiligaan gaarka ah ee aad laqaadanayso cunugaaga. U sheeg kalkaalida haddii aad u baahato waxyaabo sida barkimooyin ama buste adigoo fadhiya kursiga jiifa.
- Iska ilaali inaad qabato waxyaabo kale inta aad samaynayso daryeelka naas-nuujinta maqaarka-Isku-dhafka ah, sida lulidda, telefoon kula hadlidda, ama daawashada TV-ga. Tani waa inay noqotaa waqtii deggan oo aad ilmahaaga kula raaxaysato. Waad ka caawin kartaa maskaxdooda inay korto adigoo si tartiib ah ula hadlaya, u heesaya, ama u akhrinaya.
- Haddii aad hurdid adigoo ilmahaaga ku haysta isbitaalka, wuu ahaanayaa amaan inta aad xiran tahay marada daryeelka naas-nuujinta maqaarka-Isku-dhafka ah. **Si kastaba ha ahaatee, waligaa waa inaanad hordin inta aad samaynayso daryeelka naas-nuujinta maqaarka-Isku-dhafka ah ee ilmahaaga marka aad guriga joogto.**

Daryeelka Maqaarka-Isku-dhafka ah ee Ilmaha wata Tuubo Neefsasho

Haddii ilmahaaga uu wato tuubada neefsashada, waa inaad raacdaa tilmaamo gaar ah si loo sugo badbaadadiisa (Sawirka 2). Tuubada neefsashadu waa mid aad muhiim u ah si ay uga caawiso bogsashadooda. Mar kasta oo ilmahaaga la dhaqaajiyo, waxaa jiri kara suurtagalnimada in tuubadu ay dhaqaaqdo taasoo keeni karta dhibaatooyin neefsasho. Raac tilmaamahan:

- Weydii kalkalisada ka hor intaadan ilmahaaga sariirta ka saarin ama u gelin. **Kaliya kalkalisada iyo takhtarka neefsashada ayaa ah dadka loo oggol yahay inay ilmahaaga dhaqaajiyaan.** Waxaa laga yaabaa in shaqaale dheeraad ah loo baahdo si loo dhaqaajiyo ilmahaaga, iyadoo ku xiran nooca mashiinka neefsashada iyo qalabka kale ee uu wato.
- **Ha dhaqaajin ilmahaaga marka uu laabtaada saaran yahay adigoo haya. Wac kalkalisada si ay kaaga caawiso dhaqaajinta ilmahaaga.**
- Kalkalisadu waxay si joogto ah u hubin doontaa tuubada neefsashada ee ilmahaaga inta aad hayso. Tani waa caadi.
- **ilmahaaga mar dambe ha ku celin sariirta.** Kalkalisada caafimaadka iyo dhakhtarka neefsashada ayaa ku caawin doona.



Sawirka 2 Daryeelka maqaarka-isku-dhafka ah ee ilmaha wata tuubada neefsashada.

Haddii aad wax su'aal ah qabtid, weydii kalkalisada ama dhakhtarka ilmahaaga.

Fiiro gaar ah
